



Date: 21/04/2015

## Bayaan :

Mahad oo dhan Ilaal baa iska leh, nabadgelyo iyo ammaanna nabigeennni Muxammad ahaa, ehelkiisii, asxaabtiisii iyo intii wanaag ku raacda ilaa qiyaamaha dushooda ha ahaato.

### Intaas kadib

### Baaq Guud :

- 1- Wuxaan ugu baaqaynaa dhammaan umadda Soomaaliyeed Alle ka cabsi iyo inay qabsadaan kuna dhaqmaan Kitaabka alle iyo sunnada Nabiga ( nabadgelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaato)
- 2- Waa ku baaqaynaa in qof walbaa uu dhawro wada jirka iyo midnimadda ummadda si looga hortago afkaaraha qaldan ee ku wajahan caqiidada saxan ee ahlu sunnah .
- 3- Wuxaan ka digaynaa in afkaarta qaldan ee shiicanimadu ay deegaan iyo saldhig ka hesho dalka soomaaliya , taasoo haday dhacdo laga dhaxlaayo burbur, dagaal, is dil, iyo baaba sida ka dhacday Ciraaq, Suuriya, Lubnaan, iyo wadanka yemen
- 4- Wuxaan ugu baaqaynaa dhamaan qaybaha bulshada ee kala duwan iyo jamciyaadka islaamiga ah ee samafalka inay garab istaagaan una gurmadaan umada tabaalaysan ee muslimiinta ah, gaar ahaan kuwa kasoo qaxaya dagaalada ka socda dalka yemen, islamarkaana uga hortagaan ianaysan ka faa,idaysan hay,adaha danaha guracan wata.
- 5- waxaan taageeraynaa dhamaan dadaalada lagu samata bixinaayo diinta,dalka iyo shacabka reer yamaneed.
- 6- Wuxaan u dardaarmaynaa dhamaan bulshada qaybaheeda kala duwan gaar,ahaan dhalinyarada iyo dumarka inay ula noqdaan wax-walba oo ku soo kordha oo wax u dhimaya caqiidadooda culimada cilmiga xambaarsan si ay u helaan badbaado aduun iyo aakhiro

## **Maamulada dalka:**

- 7- Wuxaan ugu baaqaynaa madaxda soomaaliyeed in ay Ilahaay ka cabsadaan, kana shaqeeyaan danaha diinta, dadka iyo dalka, kana fogaadaan waxyaabaha iska horkeeni kara dadkooda, lana yimaadaan maamul wanaag
- 8- Wuxaan ugu baaqaynaa madaxada soomaaliyeed iyo bulshawayntaba inay ilaaliyaan amniga wadanka, iskana kaashadaan wax ka qabashada wixii keenaya khal-khal gelinta deganaanshaha iyo amniga degaanka soomalyeed.
- 9- Wuxaan ugu baaqaynaa madaxda soomaaliyeed inay xil iska saaraan ilaalinta iyo dhawrida caqiidada iyo mabaadida umada soomaaliyeed, iyo inay ka hortagaan cid walba oo khal khal gelinaysa caqiidada saxda ah, lagana saaro wadanka hay,aadka iyo jamciyaadka shiicada.
- 10- Wuxaan ugu baaqaynaa golayaasha dawlada ee kala duwan inay sharchiyo cad-cad ka soo saaraan dhamaan cid kasta oo ku hawlan fidinta caqiidada shiicada ee khaldan .

## **Culimada:**

- 11- Wuxaan ugu baaqaynaa dhamaan culimada caalam islaami (sida isutaga ururka culimada islaamka, xiriirka culimada islaamka, hayda culimada soomaaliyeed iyo golayaasha fiqiga ah dhamaan dawladaha islaamka) in ay laba laabaan dadaalkooda ku aadan iftiiminta, cadaynta,ilaalinta, caqiidada Ahlu sunaha iyo ka hortaga caqiidada firqooyinka ka leexday caqiidada saxda ah sida Shiicada, khawaarijta Iwm.
- 12- wuxaan ugu baaqaynaa culimada soomaaliyeed qaybaheeda kala duwan inay u midoobaan ka hortaga shirqoolada iyo duulaamada ku socda qaloocinta iyo majar habaabinta diinta iyo caqiidada saxda ah ee Ahlu sunaha iyadoo aan ognahay in umada soomaaliyeed 100% ay tahay ahlu sune shaaficiya ah
- 13- wuxaan ugu baqaynaa culimada inay ka haqab tiraan bulshada Soomaaliyeed barida iyo iftiiminta caqiidada qaldan ee shiicada ee ku dhisan nacaybka iyo gaalaysiinta saxaabadii iyo xaasasakii nabiga scw , si ay uga digtoonaadaan.

## **Hoggaanka Dhaqanka:**

14- Wuxaan bogaadinaynaa kaalinta ay ka gaysteen Dawlada puntland, culimada , hogaanka dhaqanka iyo dumarka heshiisiintii iyo walalayntii ay dhex dhigeen walalaha wada degan gobolka karkaar, waxaana ugu baaqaynaa inay dhameeyaan qaybaha ka dhiman iyo is raacinteeda

15- Wuxaan ugu baaqaynaa dhaqanka Soomaaliyeed inay kaalintooda ka gaystaan dhawrida wada jirka umada ay hormuudka u yihiin,iyo ilaalinta diintooda.

## **Dhalinyarada**

16- Wuxaan ugu baaqaynaa dhalinyarada inay awoodda saaraan barashada diintooda iyo culuumta anfaca u leh aduun iyo aakhiraba, iskana ilaaliyaan tahriibta , iyo u bareeridda halligaadda naftooda iyo geeri fool xun.

17- Wuxaan ugu baaqaynaa dhallinyaradu inay ka fogaadaan ka mid noqoshada kooxaha ku howlan khalkhal galinta iyo shaki ku abuurida caqiidadooda saxda ah oo ay ka mid yihiin kooxda shiicada , khawaarijtu iyo kuwa la midka ah.

18- Wuxaan ugu baaqaynaa dhalinyaradu inay la dagaalamaan fariimaha khaldan (shiicaynta ) ee lagu faafiyo baraha xiriirka bulshada iyo guud ahaan mareegaha wax lagu qoro.

## **Saxiixayaasha :**

- 1- Sheikh Daahir Aw Cabdi
- 2- Sheekh Xasan xuseen Axmed
- 3- Sheekh Cabdiraxmaan Maxamed Dhawre
- 4- Dr Sheekh Xasan Sheekh Cali
- 5- Sheekh Maxamuud Xaaji yuusuf
- 6- Sheekh Maxamed Macalin
- 7- Sheekh Axmed Cabdi Samad
- 8- Sheekh C/qani Qorane Maxamed
- 9- Sheekh Axmed Yuusuf Daad
- 10- Sheekh Faarax Maxamed Cajab
- 11- Sheekh Maxamed Xuseen Cali ( Deeq)
- 12- Sheekh Maxamed Faahiyeh Ciise
- 13- Sheekh Mukhtaar Axmed Faarax
- 14- Sheekh maxamed c/laahi c/lle